DHR
GEORGIA
DEPARTMENT OF
HUMAN RESOURCES

Revised June 2004
DPH04-132HW

OGEYSIINTA XUQUUQDA
UBADKA/ DHASHA AH/SOCOD-BARADKA
IYO QOYSKOODA
EE HOOS TIMAAD
UBADKU MA-SUGI KARAAN

DHR
GEORGIA
DEPARTMENT OF
HUMAN RESOURCES

WAAXDA KHEYRAADKA DADKA QAYBTA CAAFIMAADFKA DAD-WEYNAHA LAANTA CAAFIMAADKA QOYSKA

Xusuus Qor:

Isku-duwaha Adeegeygu waa :

_____

Tirada telefoonkiisu/keedu waa:

_____

Siyaabo kale oo aan kula xidhiidhi karo isga/ iyada:

Cinwaan:

_____

_____

_____

Email:

_____

Pager:

_____

Cell phone:

_____

Hor-dhac

Ogeysiinta ilmaha yar-yar/socod-baradka ah ee xuquuqda Qoyska ee Hoos Imaadka Ubadadku Ma-sugii Karaan ayaa qe-exaysa xuqquuqdasida lagu qeexay Qaybta C ee Qanuunka Wax-barashada ee Shaqsiyaadka Talex-yaraanta leh (IDEA). IDEA waa sharci federaal ah oo sita ugu tala-gal horey wax uga-qabashada ee carruurta xaqa u leh laga bilaabo makey dha-shaan.Iney taageerto hirgalinta waxyaabahan dawladda fed-eraalku rabaan, Joorjiya ayaa soo saartey ujeeddooyin iyo hab wax-u-qabasho la kulmaya baahidan federaalka ah iyo ta Qaybta C.

Maadaama qoraalkani yahay mid xafiis ahaan ah oo ogeysiinta xuquuqdaada markey hoos timaad sharciga iyo shu-ruudha federaalka ah, ereyada qaarkood waxa laga yaabaa iney wax qalaad kugu noqdaan. Sabataa awgeed ayaa ereyda qaarkood ayaa laguugu qeexayaa sida loogu isticmaaley qoraalka oo kuwa kalena waxa laguugu qeexayaa Ereybixinta.

Isku-duwaha adeegyada la shaqeynaya qoyskaaga ayaa kuu sheegi kara waxyaabo kale oo kaa caawin kara inaad fahanto xuquuqdaada. Isagu/iyadu waxa kale ooy kuu sheegi karaan inaad adiga iyo xubnaha kale ee qoysku ku shuraakoobi kartaan shaqo-yaqaanka sidi loola kulmi lahaa baahida kobcida ah ee ilamahaaga.

Macluumaad inta ka sii dheer la Xidhiidh:

Ubadku Ma-sugi Karaan

Xafiiska Caruurta Baahida Gaarka ah leh
Qaybta Caafimaadka Qoyska /Laanta Caafimaadka Dadweynaha
Waaxda Kheyraadka Dadweynaha ee Joorjiya

2 Peachtree Street, NW
Suite 11-206
Atlanta, GA 30303-3186
404) 657-2726
1-888-651-8224 (Toll Lacag La'aan)
http://health.state.ga.us/programs/bcw/

Tusmada Buugga

Qodabbo Muhiimeedka Nidaamka Laga bilaabo Imaadka hore ilaa Soo-saarka Qorshaha Adeegyada Qoyska Goonida looga dhigey (IFSP)……. 1

Goggol-dhig …… 4

Oggolaansho Waalid…… 6

Ogeysiinta Hore ..... …… 7

Baadhitaan Diiwaan ……..... 8

Ku Kalsoonida Macluumaadka …… 8

Xallinta Cabashooyinka Gaaraka ah ee Ilmaha……..… 13

Dhex-dhexaadin ……..…… 14

Dhageysi Gar-naq Eex-la'aan ah ……..……. . 15

Cabashooyinka Maammuleed..... …….. 18

Waalidka Ku-meel-gaadhka ah …… 20

Erey-bixin ..……..…… 22

Ubadku Ma-sugu Karaanka (UMK) Deegaanka Macluumaadka La-xidhiidhka……...…… 25

Macluumaadka Isku-duwaha adeegeyga…… 26

Xusuus Qor……..…… 27

Barnaamijka Deegaanka ee Ubadku Ma-sugi Karaan Macluumaadka Lagula Xidhiidho

Isku-duwaha Barnaamijka Deegaanku waa:

_____

Tira telefoonkiisu/keedu waa:

_____

Cinwaanka xafiiska deegaanku waa:

_____

_____

_____

Tirada "fax"ga xafiiska deegaanku waa:

_____

Maaddooyin kala-duwan: Isticmaalka ama ka qayb qaadashada laba ama in ka badan oo ah Xirfad-shaqo aqoon-teeda cilmiyeed sidii loo fidin lahaa adeegyo isku duuban oo isku duwan, oo ay ku jiraan waxqabyada qiimeynta iyo qiyaasitaanka ee IFSP ee ku dhex jira § 303.322.

Agagaaraha Dabiiciga ah: Goobaha dabiiga ama caadiga u ah carruurta la da'ada ah ilmahaaga ee aan lahayn talax-yaraan.

Waalid: "Waalid" waxay ka dhigan tahay qofka ilmaha dhaley ama korsanaya ee waalidka(yada), masu'uulka, qofka matalaya walidka dhinacooda, oo tusaale ahaan ay ka mid yihiin awoowo iyo ayeeyo ama ayaada ama ammiga ee ilmuhu la nooyahay, ama qof sharci ahaan ka mas'uul ah ilmaha, waalid ku-meel gaadh loogu talagaley ilmha si ay ula noolaadaan iyada oo la cuskanayo § 303.406, ama waalid imaha korinaya oo waafaqsan wax- ka- filitaanka UMK.

Wakaaladda Hogaanka Gobol*:* Waxay timaameysaa Waaxda Kheyraadka Dadwaeynaha, Laanta Caafimaadka Dadweynaha oo loo magacaabey wakaaladda hogaanka u ah Qaybta C ee IDEA ee gobolka Joorjiya.

F:G: Dhammaan cigashada ku jira ereybixntu waxay ku jirtaa 34 CFR Part 303.

Qodabbo Muhiimeedka Nidaamka Laga blaabo Imaadka hore ilaa Soo-saarka Qorshaha Adeegyada Qoyska Goonida looga dhigey (IFSP)

Imaadka hore -

Ilmahaaga waxa u soo diri kara Ubadku Ma-sugi Karaan adiga ama qof kale (dhakhtarka carruurta, kalkaaliye – caafimaad, daryeel caafimaad fidiye, terabist, ama waalid kale iwm.) U soo dirkaas waxa lagu qaban kara telefoon, fax, qoraal ama qofka oo yimaad. Waxay **45-cisho muddo-wakhtiyeed** ka bilaabmeysaa maalinta soo diri-taanka ay helaan Ubadku Ma-sugi Karaan.

Qaabilaadda -

Kulanka qaabilaadda hore waxay noqon doontaa waji is hor imaadka ugu horeysa ee shaqaalaha Ubadku Ma-sugi Karaan. Kulankan, waxa lagaa wareysan ilmahaaga taariikhdiisa/deeda koboc iyo caafimaad iyo waliba waxa idiinku muhiimsan qoys ahaan.Waxa lagu siin ogeysiin hore oo qoraala ah oo lagaa codsan inaad bixiso oggolaan si ilmaahaga loo qiimeeyo. Waxa kale oo dhici karta in laguu weydiiyo oggolaansho qoran Ubadku Ma-sugi Karaan siddi ay u weydiin lahaayen su'aalo arrinta la xidhiidha ilmahaaga dhakhtarkiisa/keeda iyo kuwa kale ee ku dhex jira arrimaha noloshiisa/eeda.

Horey U Ogeysiinta Waalidka -

Ogeysiis hore oo qoran waa in la bixiyaa ka hor 10 taariikh maalmeed inta ka horeysa Ubadku Ma-sugi Karaan soo jeedineyso ama diideyso iney bilowdo ama beddesho ga-rashada, qiimeynta, ama meeleynta ilmahaaga, ama u bix-inta adeegyada ku habboon ee hore wax uga-qabashada ilmahaaga iyo qoyskaaga. Waxa lagu siin ogeysiis hore inta aan la qiimeyn ilmahaaga, haddi isagu/iyadu la garto xaq in iney u leeyihiin Ubadku Ma-sugi Karaan, iyo intaan loo soo saarin ama la beddelin adeegga qorshaha qoyska ee isaga/iyada u gaarka ah.

Qodabbo Muhiimeedka Nidaamka Laga bilaabo Imaadka hore ilaa Soo-saarka IFSP (ka sii socota)

Oggolaansho Waalid -

Waxay ka dhigan tahay in adiga oo ah waalidka ama masu'uulka sharciga ah ee ilmuhu, laguu war-galiey si buuxda macluumaadka ku saabsan waxqabyada adiga lagaa codsadey inaad oggolaato. Waxaa in lagugu siiyaa macluumaadka luqadda afkaaga hooyo ama hab kale oo lagu wada xidhiidho haddii ay iska caddahay in sidaas la sameeyo ay adgag tahay mooye. Waxa lagu weydiisan inaad oggolaan bixiso mar kasta oo baadhitaan, qiimeyn, iyo qiyaasiyaan la sameeynayo iyo ka hor intaan la bixin adeegyada horey wax uga-qabashada.

Baadhista Hore -

Badhitaanka hore waxa ka mid ah isticmaal qalab gaar ah ama hab wax u qabad marka ugu horeysa ee boqashada qaabilaadda, ama wakhti ku habboon sidii loo garan lahaa in waxqabayo qiimeyn iyo qiyaasid dheerad ah loogu baahan yahay ilmahaaga. Baadhitaanka hore laga yaabe in loo dhameystiro ama aan la dhameystrin ilmahaaga iyo qoyskaagaba.

Qiimeyn & Qiyaasitaan -

Qiimeyn waxay ka dhigan tahay isticmaalka qalabka iyo habka wax-u-qabad ee shaqaalaha ku habboon, ee khibradda u leh dhammaan wakhtiyada ilmuhu xaqa uu u leeyahay hoos imaadka Ubadku Ma-sugi Karaan ee ay ku garanayaan. *Qiyaas* waxay ka dhigan tahay isticmaalka qalabka iyo habka wax-u-qabad ee shaqaalaha ku habboon, ee khibradda u leh, sidii ay u garan lahaayeen waxa uu xooga ku leeyahay ilamahaagau, baahida iyo waliba sida loo kala horeysiinayo kheraadka iyo welwelka qoyska iyo adeegyada iyo taageeryinka loo baahan yahay si kor loogu qaado kartida qoysku iney la kulmaan baahida koritaanka ilamaha yar ama socod baradka ah ee baahida gaarka ah leh.

Qiyaasid Qoys: Garashada khyraadka qoyska, waxa sida ay ugu kala muhiimsantahay iyo waxay ka welwelsan yihiin, iyo garashada taageerada iyo adeegyada loo baahan yahay sidii loo kordhin lahaa kartida qoysku u leeyihiin iney gaadhaan baahida kobcitaan ee ilamha.

Adeegyada Qorshaha Qoyska Goonida u ah (IFSP): Qorshaha qoran ee u fidinta adeegyada hore wax uga-qabashada ee carruurta iyo qoysaska u qalma ee:

(a) Ee ay u sameeyeen wadajir qoyska iyo shaqaalaha ku habboon, ee xirfadda u leh bixinta adeegyada horey wax uga-qabashada;
(b) Ee ku dhisan maadooyinka kala duwan ee qiyaasitaanka iyo qiimeynta ilmaha iyo qiyaasitaanka waxa u ilmahu xoogga ku leeyahay iyo baahida qoyska ilmaha, sida ay u garataan qoysku iyo sida ay fareyso 34 CFR 303.322;
(c) Waxa ku jira waxa-ka-soo baxa kobcinta, xeeladaha, iyo waxqabayada; iyo
(d) Waxa ku jira adeegyada looga baahan yahay sidii loo kordhin lahaa kobcidda ilmaha iyo kartida qoyska sidii ay u gaadhi lahaayeen baahida gaarka ah ee ilmaha.

Wakaaladda Hogaanka deegaanka: Waxay sheegeysaa guddiyada caafimaadka mid ka mid ah oo maammusha nidaamka Ubadku Ma-sugi Karaan ee jira agagaarka ee 19ka deegaannada caafimaad.

Dhex-dhexaadin: MediDhexdhexaadintu waa nidaam ka caawiya, waalika, UMK, fidiyeyaasha iney xalliaan afgaranshawaaga si iska caadi ah, oo aan ahayn jawo aan lahayn colaad. Dhexdhexaadintu waa ikhtiyaar oo lada qolo ama qayboodba waa iney si xor ah ugu heshiiyaan iney ka qayb qaataan. Dhexdhexaadintu ma aha in loola isticmaalo u diiditaan ama ka raajin xuquuqda aad u leedahay dhageysi eex-la'aan ah.

EREYBIXIN

Qiyaasitaan: Habka wax-u-qabad ee hadda socda ee ay u istcimaalaan shaqaalaha ku habboon, ee khibradda u leh dhammaan wakhtiyada ilmuhu xaqa uu u leeyahay hoos imaadka UMK ee ay ku garanayaan:

(a) Ilmahu adkaanta gaarka ah ee u leeyahay iyo adeegyada ku habboon in baahidaa la helo;

(b) Kheyraadka, kala horaanta waxa loo baahan yahay, iyo waxay qoysku ka welwelsan yihiin qoysku, iyo taageerada iyo adeegyada loogu baahan yahay in kor loogu qaado kartida qoyska iney gaadhaan baahida kobaca ilmahooda yar ama socod-bardka ah ee leh taxa-yaraanta; iyo

(c) Dabciyan sida ay tahay iyo inta ay le'egtahay adeegyada horey wax uga-qabashadu ee ilmuhu u baahan yahay (a) iyo (b) korka.

Shaac-uga-qaad: Toggolaansho marin u siin ah ama sii deyn, wareejin, ama si kale oo lagu wada xidhiidho oo ah diiwaanka waxbarasho, ama macluumaadka shaqsiyeed ee la garan karo ee ku jira diiwaankan, kooxo ama qolo kale.

Qiyaasitaan: Qaab wax u samaynta ay isticmaalaan shaqaalaha ku habboon, ee xirfadda u leh si ay u gartaan ilmaha in uu u qalmo adeegyada horey wax uga-qabashada marka la hoos yimaad UMK. Habka wax-loo-qabto ee la isticmaalo oo la socota qeexitaanka ilamaha dhasha ah iyo kuwa socod-baradka ah" ee ku jirta 34 CFR 303.16, ooy ku jirto garashada heerka uu ilmuhu taagan yahay ee qaybaha kobcitaanka.

Qoys: Waxa lagu micneeyaa kolba qoys kastaa sida ay isku qeexaan, ooy jiraan qofka ay wada jiraan.

Qodabbo Muhiimeedka Nidaamka Laga bilaabo Imaadka hore ilaa Soo-saarka IFSP (ka sii socota)

SooSaarka *Qorshaha Adeegyada Qoyska Goonida u ah (IFSP)*

Ubadku Ma-sugi Karaan heerka laga filayo waxay u baahan tahay ilma kasta Qorshaha Adeegyada Qoyska Goonida u ah (IFSP) u lahaan doono waa in lagau soo saaraa **45 maalmood** laga bilaabo maalinta ugu horeysa ee la soo diro. Marka dib—dhigitaan ay codsadaan qosku sabab kasta ha noqotee (bukaan, cusbitaal seexasho, fasax, jadwalka shaqada, iwm.), ka rabitaanka jadwalkan aguma shaqeysanao oo laga yaaba iney dib u dhigto bilaabitaanka adeegyada ee ilmahaaga iyo qoyskaba.

Gogol-dhig

Nidaamka IDEA ee qaybta C ee Joorjiya, ee loo yaqaan Ubadku Ma-sugi Karaan (UMK), ayaa waxa loogu talagaley iney kordhiso ka qayb qaadashada qoyska oo la hubiyo in waalidku raali ka yihiin tallaabo kasta oo nidaamka ka mid ah oo ah marka la eegayo inaad u qalanto ilaa marka adeegga la bixinayo. Ilaalin ama xuquuq ayaa loo sameeyey sidii loo dhawri lahaa waalidka iyo carruurta. Waalidka waa in loo wargaliyaa xuquuqdan ama ilaalintan si ay ugu yeeshaan door hogaammin ah marka adeegga loo fidinayo carruurtooda. Ka qayb qaadashada UMK ee Joorjiya ee ilmaha dhasha ah iyo socod baradka waa mid iskaa kaga qayb-gal u ah adiga iyo qoysakaaguba.

Marka la hoos yimaad UMK ee Joorjiya, adiga oo ah waalidku, waxaad leedaahay xuquuqda soo socota:

- Xuquuda maaddooyin kala-duduwan ku qiimeynta iyo ku qiiyasta wakhti dhowrka leh iyo kobcinta Qorshe Qoys Adeeg Gooni ah (IFSP) shan iyo afartan (45) maalmmaha taariikhda gudahood ah lagana bilaabo soo gudbista ilaa UMK;
- Haddii aad u qalanto marka la eego UMK, xuquuda u qoondeynta adeegyada hore wax uga-qabshada ilmahaagu iyo qoyskaagaba waxa lagu qaadaa dhigayaa IFSP;

  Marka Joorjiya la eego*, "u qoondeynta adeegyada hore wax uga-qabshada" ayaa waxa loogu fiirsada nidaamka IFS. IFSPgu waa in uu wataa weedh ku saabsan adeegyada horey wax uga-qabashada gaarka ah looga baahan yahay si loola kulmo baahida ilmaha iyo qoyska sidii loo gaadhi lahaa waxa ka soo bixi doona ee lagu tilmaamey IFSP. Qawaaniinta dawladda sare waxay qeexayaan adeegyad horey wax uga-qabashaduin ay yihiin adeegyo ah in " loo sameeyeyin ay la kulmmaan baahida kobaca ilmo kasta oo u qalma qaybtan hoosteeda iyo baahida qoyska ee la xidhiidha kor u kaca kobaca ilmaha."*

(d) Waa iney ku noolaadaan agagaarka jooqraafi ahaan u ku nool yahay ilmuhu, mar kast aoo ay suurto gali karto.

Waalidka ku meel-gaadhka ahi waxay wakiil uga noqonayaan ilmaha dhammaan arrimaha la xidhiidha:

(1) Qiimeynta iyo qiyaastaanka ilamaha;
(2) Kobcinta iyo hir-galinta IFSP yada ilmaha, oo ay ku jiraan qiimeynta sannadkiiiyo dibu-fiirinta xilliyada qaarkood;
(3) U fidinta socota ee adeegyada horey wax uga-qabashada ee ilamaha; iyo
(4) Xuquuq kasta oo lagu sameeyey hoos imaanta UMK.

Cabasho sheeganeysa wakaalad dadweyne ama mid gaar loo leeyahay oo ka soo bixi weydey iney hir-galiso go'aan nidaam ka-naq lagu soo gaadhey waa in ay xallisaa Wakaalada Hogaanka u haysaa.

WAALIDKA KU-MEEL-GAADHKA AH

Xuquuqda caruurta xaqa u leh hoos imaadkda UMK waa in la dhowraa in kasta oo: :

(1) La garan waayo waalidka;
(2)Wakaaladda hogaanka ahi, marka ay sameysey dey-dey ku filan, ay weydey goobta ay joogaan waalidku; ama
(3)Ilmuhu u gacanta ugu jiro gobalka marka la eego sharciga Joorjiya.

Waxa loo sameyn qof u noqda "ku meel-gaadh waalid marka la eego habkaa wax-u-qabasho ee soo socda. Waxa ku jira habkaas wax-u-qabasho hannaan lagu garto in ilmuhu u baahan yahay waalid ku meel-gaadh ah iyo in kale oo loo samyn doonaa waalid ku meel-gaadh ah ilmaha. Shuruudaha soo socda ayaa lagu shaqesytaa marka la dooranyo waalidka ku meel kaadhka ah.

(1) Waalidka ku meel-gaadhku waa lagu doortaa sida ay sharciga gobalku farayo.
(2) Qofka loo doorto waalid ku meel=gaadh ahi:
    (a) Ma laha wax dano ah oo isagu ama iyadu wakiil ka yahay/tahay oo ka hor imanaya danaha ilmaha
    (b) Wuxuu qofkaasi leeyahay aqoon iyo khibrad hubineysa wakiil ka noqoshada ilmaha;
    (c) Ma aha shaqaale wakaald ay leedahy gobalku ama qof ama shaqaale ah oo fidiya adeegyo horey wax uga-qabashoada ilmaha ama xubin ka tirsan qoyska ilmaha. Qof sidiisa kale ugu qalma shaqada waalid ku-meel gaadhka ah oo hoos timaad qaybyani kuma noqon karo shaqaale sabata oo ah isaga ama iyada ayey wakaald dadweyne lacag u siisaa iney waalid ku meel-gaadh ah noqdaan; iyo

- Xuquuq lagu heli karo qiimeynta, qiyaasitaanka, kobcidda IFSP, Isku-duwidda adeegga, iyo dhowridda qaabka oo kharash bixin la'aan ah. Waxa laga yaabaa in lagugu soo dallaco kuwa kale oo ka mid adeegyada horey wax uga-qabashada marka la eego Falanqaynta Maaliyadda ee ka Qayb-qaadashada Kharashka. Hase ahaate, karti laaanta bixinta kharashku, sida lagu qeexay Falanqaynta Maaliyadda ee ka Qayb-qaadashada Kharashka, kama hor istaageyso ilmahaaga iyo qoyskaaga iney helaan adeegyada horey wax uga-qabashada.
- Xuquuq u lahaanta diiditaanka qiimeynta, qiyaasta, iyo adeegyada;
- Xuquuq u lahaanta in lagugu marti qaado inaad ka qayb qaadato kullanda IFSP leedahay oo idil;
- Xuquuq u lahaanta inaad hesho ogeysiis qoraal ah oo 10 taarikh maalmood ah inataisbeddle aan la soo jeedin ma aan la diidin sidii loo garan lahaa, loo qiimeyn lahaa, ama loomeeleyn lahaa ilmahaaga, ama marka loo bixinayo adeegyada ilmahaaga ama qoyskaaga;
- Xuquuq u lahaanta ku helka adeegyada agagaarka dabiiciga ah ilaa xadka ay ku habboon tahay;
- Xuquuq u lahaanta sidii loo hubin lahaa ku kalsoonida asturka macluumadka shakhsiga lagu garan karo.
- Xuquuq u lahaanta dib u fiirinta iyo, hadday habboon tahay, sixitaanka diiwan-galka horey wax uga-qabashada;
- Xuquuq u lahaanta nidaam dhageysi cadaalad-ku-fadhi ah oo sidii loo xallin lahaa waalidka/fidiyaha is-afgaranshawaagooda. iyo
- Xuquuq u lahaanta inaad cabasho maammuleed aad sameyso.

Waxa u sii dheer oo kale xuquuqda guud ee korka ku xusan, waxaad xaqa aad u leedahay in lagugu war-galiyo nidaamka gaarka ah ee dhowritaanka hoos yimaad UMK. Xuquuqyadan waxa ka mid ah: Oggolaansho Waalid; Ogeysiin Hore; Baadhitaanka Diiwaanka, Cabashooyinka Ilmaha Gaarka ah; Cabashooyinka Maammuleedka; iyo Waalidada Ku-meel-gaadhka ah. Mid kasta oo ka mid ah ilaalintaasi ayaa hoos lagu sharaxayaa.

OGGOLAANSHO WAALID

Oggolaansho Waxay ka dhigan tahay: (1) in si buuxda lagugu war-galiyey macluumaadka ku saabsan waxqabayada oggolaansha loo rabo, oo laguugu bixiyey **luqaddaada hooyo,** ama wada xidhiidh kale (2) inaad fahantey ood ku oggoshahay qoraal ahaan ku kaca waxqabayada loo rabo oggolaanshaha, oo oggolaanshuhu waxa u qeexayaa waxqabadkaa oo iyaguna qorayaa waxa galey diinwaanka (haddii ay jiraa wax uun) ee la sii deyn doono; iyo (3)inaad adigu fahasanytahay in bixinta oggolaanshuhu yahay wax ikhtiyaar ka yahay dhinacaaga oo dib loola soo noqon karo wakhti kasta.

Luqadda Hooyo: Meesha lagu isticmaalo ee loola jeedo dadka aqoonta Ingriisigu ku xaddidan tahay, ama qaabka wada xidhiidh ee caadiga ay ul isticmaalaan waalidka ilmaha u qalma.

Oggolaanshahaaga qoran waa in la helaa ka hor:

(1) Qiimeynta iyo qiyaasta ilmahaaga marka aan la samyn; iyo
(2) Marka la bixiyo horey wax uga-qabashada.

Haddii aad oggolaan weydo, wakaaladda deegaanka hogaanka ka ah ayaa intii la karo u hubin inaad adigu:
(a) Si buuxda aad u garaneyso waxa qiimeyntu iyo qiyaasitanku waxa la heli karo ee adeegyo ah; iyo
(b) Fahansantahay in ilmahaagu heli karin adeegyada qiimeynta iyo qiyaasitaanka, haddii la bixin waayo oggolaansho.

Haddii aad u bixin weydo oggolaansho, wakaaladda hogaanka ka ah deegaanka ayaa laga yaabe: (1) iney ku siiyaan qoraallo arrintaas ku saabsan ama waxyaabo kale; (2) iney kuugu baqaan inaad qaadato talo ay ku siiyaan dadka aad isku xaaladda tihiin sidii aad u fahmi lahayd qiimaha hore wax uga-qabashada iyo iney wax kaaga sheegaan waxa ka welwelsantahay marka la eego ka qayb-qaadashada nidaamka UMK; (3) Iney wakhtiyada

Marka ay Wakaalada Hogaanka Gobolka u ahi hesho cabashada, waxay haystaan 60 taariikh maalmood (haddii ay jiraan xaalado duruufaha ka baxsan mooye) iney baadhaan cabashada oo ay soo saaraano'aan qoraal ah oo sheegaya wixii dhab ahaan u dhacay iyo gabagabeyntii arrinta iyo go'aankii ugu danbeeyey. Qofka ama urrurka faylka cabashada sameeyey ayaa fursad u leh iney ku soo biiriyaan akhbaar dheeraad ah, ama ha noqot hadal ama qoraal, ku saabsan cabashada. Haddii go'aanka ugu danbeeyaa sheegayo inaan loo horey bixin/la bixinnin hadda adeegyo aan habbooneyn, Wakaalada Hogaanka Gobolka u ahi waa in arrintaasi wax uga qabataa sidii dib-ugu-dhexdhexaadin ay ugu sameyn lahayd u diiddkaa adeegyadaas, oo ay ku jiraan, kolba sidey ku habboon tahay, siinta lacag u-celin ama si kale oo arrinta lagu hagaajinayo. Wakaalada Hogaanka Gobolka u ah waa iney wax ka qabataa u fidinta adeegyo wakhtiyada soo socda ubadka dhasha ah iyo kuwa so-cod-baradka ahba ee leh talax-yaraanta leh iyo qoysaskoodaba. Akhbaar intaa ka sii dheer ee ku saabsan nidaamka cabashada, la xidhiidh xafiiska Gobolka ee UMK halkan (404) 657-2726 ama 1-888-651-8224.

Haddii cabasho qoran la helo oo iyaduna ah mawduuc ahaan hadda lagu gar-qaadayo nidaam, ama sidata arrimo badan, oo hal ama qayb ka badani oo h dhageysigaasi waa in Gobalku arrintaa gooni u dhigaan gar-qaadka lagu jiro ilaa inta la gabagabeynaayo dhageysigaasi. Hase ahaate, arrin kasta oo cabashada ah oo aan ka mid ahayn qayb ka mid nidaamka gar-qaadka waa in lagu xalliyaa muddo ah 60 taariikh maalmood iyada oo la isticmaalayo qaab-nidaameedka cabashada ee lagu qeexay duumeentigan.

Haddii arrinta lagu soo qaado cabasho maammuleed oo mar hore go'aan lagaga gaadhey dhageysi nidaam gar-naq ah oo laba qolo u dhaxaysey –
(i) Go'aanka dhageysigu waa mid qabasho leh ama lagu dhaqmayo; iyo
(ii) Waa in Wakaaladda Hogaanka ahi waa iney sidaas ugu sheegtaa qolada cabatey.

CABASHOOYINKA MAAMMULEED

Waxa u sii dheraad ah nidaamka Cabashooyinka Ilmaha shaqsiahaaneed, (ee lagu soo qaadey qaybatii hore) qofka shaqsiga ah ama urrura, ooy ku jiraan qof shaqsi ah ama urrur ka socda gobol kale, ayaa soo hor dhigi kar cabasho qoran oo saxeexan oo wakaalad dadka ka dhaxaysa ama mid gaar loo leeyahayba ah oo adeegyo u fidisa kana qayb qaadaneysa UMK, kuwaaso ku xad-gudbey waxa looga baahan yahay ee barnaamijka Qaybta C.

Waa iney la socdaan cabashada :

(1) Weedho odhanya in wax looga baahnaaa Qaybta C ayey ku xad-gudubtay wakaaladda ookaanka u ah dekaanku;iyo
(2) Waxyaabaha dhabta ah ee ay ku dhisan tahay cabashadu.

Cabashooyinka waa in boostada loogu diraa cinwaankan: Babies Can't Wait, Division of Public Health, Georgia Department of Human Resources, #2 Peachtree Street, Room 11-206, Atlanta, Georgia 30303-3186. Cabashooyinka waxa kale oo lagu diri karaa fax halkan (404) 657-2763. Cabadhada waa in loo galiyaa faylka wakaaladda hogaanka ka ah deegaanka hal sano gudaheed marka ay dhacday xad-gudbku. Xaalado gaar ah awgeed in cabashada in la galiyo faylaka waxa laga yaabaa in wakghtiga loo dheereeyo:

(1) Haddii wali xad-gudbku ku socdo ilmahaas ama carruur kale;
(2)Haddi qofkaas sameeyey faylka ay codsanayaan in lacag-celin ama tallaabo la qaado wax hagaajin ah xaq-gudub dhacay saddex sano gudaheed markii faylka cabashada la galiyey.

qaarkood kaala soo soo xidhiidhaan arrinta si cusub, wakhtiyo gaah ah oo go'an, si ay bal u eegaan inaad beddeshey-go'aankaagii hore sidii aad uga qayb gali lahayd UMK; iyo (4) la bilaabo nidaam dhageysi cadaalad-ku-fadhi ah oo sidii loo xallin lahaa waalidka/fidiyaha is-afgaranshawaagooda.

Waxa intaa sii dheer, haddaad tahay waalidka ilmo u qalma hoos imaadka UMK, waxaad go'aan ugu gadhi gartaa, ilmahaaga, ama xubnaha qoyskaaga iney u oggolaadaan ama aad u diidaan adeegyada horey wax uga-qabashada ee barnaamijkan.Waaxa diidi kartaa oo kale addeeggan oo kale kaddib markaad aad oggolaatey adiga oon waxba u dhimmin kuwa kale ah adeegyada horey wax uga-qabashada ee hoos yimaad UMK.
Ugu danbeystii waxaad xuquuq u leedahay ogeysiin qoran oo ah is-weydaarsiga **macluumaadka la garan karo ee shakhsiga** la ururiyey, la isticmaaley ama lagu hayo UMK. (Eeg qaybta Ku- kalsoonida Macluumaadka).

Macluumaadka shaqsi ahaan la garan karo waxa ku jira: 1) Magaca ilmahaaga, magaacaaga, ama magaca xubnaha kale ee qoyska; 2) cinwaanka ilmahaaga; 3) wax shaqsi ahaan lagu aqoonsado, ooy ka mid tahay tirada sooshiyal sakuuritiga ilmahaaaga ama ka aad adigu leedahay, ama 4) liis astaamo shaqsi ahaan ama macluumaad kale oo suurto galeneysa in lagu garto ilmahaaga oo si hubaal ahaan ah u caqli karta

OGEYSIINTA HORE

Ogeysiis hore oo qoran waa in la bixiyaa ka hor <u>10 taariikh maalmeed</u> inta ka hor wakaaladda hogaanka deegaanka ka ahi ayna soo hor dhigin ama diidin iney blowdo ama beddesho helitaanka, qiimeynta, ama meeleynta ilmahaaga, ama loo bixin adeegyada horey wax uga-qabashaada imahaaga iyo qoyskaaga.Ogeysiintu waxay si kugu filan kuugu faahfahisaa iney kuu wargaliso:

(1) Waxa lagu kacayo ee lagu soo hordhigey ama waxa laguu diidey;

(2) Sababta loo qaadey tallaabada;
(3) Dhammaan hababka wax dhowrka ama ilaalinta ee laga hoos helo UMK; iyo
(4) Nidaamka UMK ee cabashada, ooy ku jiraan qeexitaanka sidii loo sameyn lahaa cabashada iyo wakhtiyada hoos yimaad hababkan. (Eeg qaybta Cabashooyinka Maammuleedka)

Ogeysiintu waa iney noqotaa:
(1) Mid ku qoran luqad dadweynuhu guud ahaan ay fahmi karaan oo lagugu fidiyey luqaddaada hooyo, ayna ahayn mid aan suurto-gal ahayn mooyee.
(2) Haddii afkaaga hooyo ama qaab kale oo wada xidhiidh ahi uuna lahayn af qoran, wakaaladda hogaanka u ah deegaanka yaa tallaabooyin qaadi sidii loo hubiyo lahaa:
    (a) Ogeysiintu in laguugu turjumo hadal ahaan ama qaab kale adiga luqaddaada hooyo ama hab kale oo wada xidhiidhitaan;
    (b) Inaad fahmi karto ogeysiinta; iyo
    (c) Iney jiraan caddayn qoran oo ku saabsan in baahida loo qabo qaybtan la oofiyey.
(3) Haddii aad tahay qof dhagoole, indhoole, ama aadan lahyn luqad qoran, qaabka wada xidhiidhku waa in uu noqdaa ka adigu caadiga aad u isticmaasho (ooy ka mid yihiin luqadda farocalaamad ku hadalka, Braille, ama ku xidhiidhka hadalka).

BAADHITAAN DIIWAAN

Iyada oo la cuskanayo Ku-kalsoonida Nidaamka Macluumaadka ee lagu soo qorey buuggan yar, waa in lagu siiyaa fursad ah baadhitaan iyo dib u fiirinta diiwaanka la xidhiidha arrimaha qiyaasta, qiimmeynta, u qalmmitaanka sida lagu go'aansadey, kobcitaanka, sidii loo hir-galieyey IFSP, cabashooyinka shaqsiyada ee la xidhiidha ilmahaaga, iyo qayb kasta oo kale ee khseysa UMK diiwaankeeda ku saabsan ilmahaaga iyo qoyskaaga.

KU-KALSOONIDA MACLUUMAADKA

Wakaaladda hogaanka ah ee deegaanka ayaa fursad kuu siineysa in la baadho oo la dib loo fiiriyo wax kasta oo diiwaanka

(2) Inaad caddayn keeno, ka hor timaad, suaalo dhinac kasta ka weydiiso, oo aad ku dirqido iney markhaatigu yimaaddaan;

(3) Inaad u diido nidaamka gar-naqa u soo bandhigga caddayn aan mar hore shaaca lagaaga qaadin ugu yaraan shan taarikh maalmood kar gar-qaadkaas;

(4) Inaad hesho nidaamka qar-naqa ahaa oo qoran ama hadal elekroonik ah (erey-erey ahaan) oo markaa qoraal lagu guuruyey; iyo

(5) Inaad hesho wixii la heley ee runta ahaa iyo go'aannadii oo qoran.

Gar-qaad kasta oo hir-galinaya nidaam cadaalad ah ee qaybtani waa in lagu qaadaa gob iyo wakhti adiga sidii wax caqliga gali kara kuugu haboon adiga.

Iyada oo aan ka danbeyn 30 taariikh maalmood kadib markaad hesho waraaqda is-afgaranshawaaga (cabashada), dhageysiga nidaamka cadaaladda u gar qaadka ee looga baahan yahay qaybtan waa in la dhameystiraa, oo go'aanka oo qoraal ah boosta loogu diraa labada dhinac qolo kastaba.

Qolada ku qanci weyda waxa la soo heley iyo go'aanka dhageysiga gar-naqaas aan eexda-lahayn ayaa xaq u leh iney furtaan dacwad shicib oo ah maxkamad gobalka ama federal ah.

Inta wakhtiga ay socoto gar qaadkaasi oo ka dhaxeeya is-afgarnshawaa (cabasho) waalid/fidiye kala dhex marta, haddii wakaaladda hogaanka deegaanka ahi iyo adigu aad ku heshiisaan mooye, ilmahaaga iyo qoyskaaguba sidii ayey u wadnayaan iney u helaan adeegyada ku habboon ee hore wax uga-qabashada ee markaa loo bixiyo. Haddii is-afgaranshawaagu (cabashadu) ku lu leedahay arjiga hore ee adeegyada, ilmahaaga iyo qoyskaaguba waa iney helaan adeegyada aan la isku diiddaneyn.

dhageysiga cadaaladeed ee eex-la'aanta ah. Sarkaalkiisha dhageysgu waa iney lahaadaan:

(1) Aqoon u lahaadaan xeerarka UMK iyo baahida, iyo adeegyada jira, carruurta iyo qoyskooda u qalma; iyo

(2) Iney qabtaan shaqooyinka soo socda:

- Dhageystaan soo jeediiska fikridaha cabashada/is-afgaranshawaaga ku lug leh;
- Iney baadhaan macluumaadka la xidhiidha arrimaha ;
- Raadiyaan iney gaadhaan xallinta is-afgaranshawaaga wakhti habboon; iyo
- Bixin diiwaan galin ku saabsan sida arrimo u dhacayaan, ooy ku jiraan go'aan qoraal ah.

Saraakiisha dhageysiga arrinta ee loo isticmaaley **dhageysiga cadaaladda eex-la'aanta ah** iyo dhexdhexaadiyeyaasha loo isticmaaley dhexdhexaadiska waa iney noqdaan "eex-la'aan" ***Eex-la'aan*** ka dhigan tahay qofka loo magacaabey in u noqdo sarkaalka dhageysiga (ama dhexdhexaadiye) nidaamka eex-la'aanta cadaalad u bixinta:

(1) qofku uuna noqon shaqaale wakaalad kasta ama barnaamij ku jira iney fidiyaan adeegyada hore wax uga-qabashada ama daryeelka ilmaha;

(2) qofku ka lahayn dane shakhsi ama shaqo ahaan oo ay ka iman karaan is-hor imaad aragtidiisa/deeda marka ay hirgalinyaan nidaamka;

(3) qofku uuna ahayn sarkaal guddiga caafimaadka deegaanka ku jira;

Qofka has eyeeshe u qalma shaqada marka la eego qaybtan loo qaadan maayo iney u shaqeeyaan wakaaladda iyada oo kaliya la eego lacag siinta iney hirgaliyaan nidaamka xallinta is-afgaranshawaaga.

Marka la hoos yimaad UMK, waxa adiga lagu siinayaa xuquuqa hoosta lagu xusey ee mid asta oo ka mid ah nidaamka dhageysiga cadaaladda eex-la'aanta ah ee lagu qaadey qaybtan hoosteeda.

(1) In u ku soo raaco oo u kula taliyo qareen iyo shaqsiyo kale oo aqoon gaar ah iyo tababr u leh adeegyada hore wax uga-qabashada ee carruurta ee hoos yimaad UMK;

hore wax uga-qabashada ku jira ee ilmahaaga khuseysa oo loo ururiyey, lagu hayo ama, lagu isticmaaley iyada oo ku hoos jirta UMK. Wakaaladda hogaanka u ah deegaanku waxay u hogaansami doontaa waxa la weydiisto iyada aan lala sugeynnin wax yaabo aan loo baahneyn iyo ka hor kulanka ku saabsan IFSP ama u fadhiisi dhageysi la xidhiidha, garashada, qiimeynta, meeleynta, ama siinta adeegyada horey wax uga-qabashada habboon, oo ayna arrin kasta noqon, 45 taariikh maalmeed kadib marka codsiga la sameeyo.

Xuquuq u lahaanta in la baadho ama dib loogu fiirsado diiwaanka horey wax uga-qabashada waxa ku jira:

(1) Xuquuqda in laga helo wakaaladda hogaanka ah deegaanka jawaab ku saabsan su'aal caqliga gali karta oo ku saabsan faahfaahin iyo micneynta diiwaanka horey wax uga-qabshada waxa ku jira;

(2) Xuquuqda ah in la weydiisto wakaaladda hogaanka ah deegaanka iney ku siiyaan nuqullo ah diiwaanka horey wax uga-qabashada eey ku jiraan macluumaad haddii lagu siinwaayo kaa hor istaagaya inaad ku shaqeysato xuquuqdaada ah eegto ama dib aad ugu fiirsato diiwaanka waxa ku jira horey wax uga-qabashada; iyo

(3) Xuquuq u lahaan in qof adiga kaa wakiil ahi u eego ama dib u fiiriyo waxa diiwaanka hore wax uga-qabashada ku jira.

Micneyntan soo socota ayaa qaybtan lagu isticmaalayaa:
1) **Burburin** micneheedu waa sheyga burburintiisa ama ka qaadka wixii lagu garan lahaa shaqsiga;
2) **Diiwaan galka horey wax uga-qabashada** micneheedu waa diwaanka lagu soo qaadey Qaanuunka Asturaadda shaqsiyadda ee Xuquuqda Qoyska ee waxbarashada (FERPA); iyo
3) **Wakaaladda la wadaageysa** micneheedu waa wakaalad ama machad kasta oo ururiya, haya, isticmaala macluumaada shaqsi ahaan loo garan akaro, macluumaad laga qaatey, qaybtan hoosteeda.

Wakaaladda hogaanka u ah deegaanka ayaa u qaadan karta inaad awood u leedahay inaad eegto ma dib ugu fiirsato diiwaanka la xidhiidha ilmahaaga haddii wakaaladda hogaanka ah deegaanka lagula taliyey inaadan lahayn awoodda marka la eego sharciga gobalka ee arrintaasi loola dhaqmo ama amr maxkamadeed oo xukunta arrima ay ka midka yihiin masu'uul ka noqoshada carruurta, kala tagga, iyo is-furka.

Mid kasta oo ah wakaaladda hogaanka ah deegaanka ayaa hayin doonta diiwaanka dadka marinka u leh diiwaanka horey wax uga-qabashada waxa ku qoran ee la ururiyey, lagu hao, ama lagu isticmaalo marka la hoos yimaad UMK. (La reebo marin u helka waalidka, iyo shaqaalaha awoodda loo siiyey ee wakaaladda ka qayb qaadaneysa), oo ay ku jiraan magaca qofka ama kooxda, taarikhda maalinta marinka loo siiyey, iyo sababta qofka ama kooxda loo siiyey awoodda ay ku isticmaalaan diiwaanka horey wax uga-qabashada.

Haddii midna macluumaadka diiwaanka horey wax uga-qabashada ku jiraan hal ilmo wax ka badan waxaad xuquuq u leedahay inaad eegto oo dib aad ugu fiirisato macluumaadka khuseysa ilmahaaga, ama laguu sheego macluumaadka gaarka ah.

Wakaaladda hogaanka u ah deegaanka ayaa bixin doonta, marka la weydiisto, liiska noocaca iyo goobaha diiwaanka horey wax uga-qabashada ee la ururiyey, lla hayo, ama ay isticmaasho wakaaladdu.

Wakaaladda hogaanka u ah deegaanka ayaa dhici karta in ay kugu dallacaan lacagta nuqulka lagu qaadayo ee horey wax uga-qabashada ah ee loo sameynaayo waalidka marka la hoos yimaad UMK haddii lacagtaas ayna iska kaa hor istaageyn inaad isticmaasho xuquuqdaada ah inaad eegto ama dib ugu fiirsato diiwaankan horey wax uga-qabshada. Waxa laga yaabaa ineyna lacag lagaa qaadin inaad baadho ama aad soo hesho macluumaad hoos yimaad UMK.

Heshiiska dhexdhexaadintu waa in noqdaa ayaa ku qanacsan yihiin labada qolaba oo ayna ka hor iman sgharciyada gobolka ama ka dawladda sare ama ujeedooyinka UMK. Labada qolaba waa iney saxeexaan heshiiska oo waxa la siin doona nuqul qoran marka ay dhexdhexaadinu dhammaato. Wada hadalka isla markaa nidaamka dhexdhexaadinta dhaca waa in uu asturnaadaa oo in loogu isticmaalo ma aha hadhow markale haddii ay dhacdo u fadhiisi nidaam cadaaladeed oon cidna u taageereynnin ama is-ashtakeyn kaleba, oo qolooyinka ka qayb qaadanaya nidaamka dhexdhexaadinta ayaa laga yaabe looga baahn doonaa iney saxeexaan ballan -qaad asturitaanka ka hor intaan la bilaabin nidaamka.

UMK ayaa Masuuul ka kharshka ee la xidhiidha nidaamka dhexdhexaadinta. Adigu haddaad tahay(tihiin) waalid (do) kharash idinkuma dallacmayo.

Waxa laga yaaba in labadiin qolaba iskumar codsataan dhexdhexaadin iyo dhageysi nidaam cadaalad ah. Haddii heshiis laga gaadho dhexdhexaadinta, dhageysiga la qaban doono waa la joojin.

Dhageysi Gar-naq Eex-la'aan ah

Nidaam cadaalad dhageysi eex-la'aantu waa lagu dhammeeyaa, oo goaan qoran la sameeyaa, gudaheeda 30 taariikh maalmood laga bilaabo codsiga. (Dexdhexaadinta,haddii la isku dayo, waa iney dhacdo isla 30kaas taariikh maalmood gudahooda).

Marka u waalid(do) bilaabo cabasho iyaga oo u sheegaya wakaaladda hogaanka ka ah deegaanka, si qoraal ah, codsi ah dhgeysi cadaald eex-laaan ah in ala alguu sameeyo. Waa inaad saxeexdaa cabashada oo aad ku dartaa weedho tilmaamaya qodabka(ada) lagu heshiin waayey ee la xidhiidha, garashada, qiimeynta, meelynta ilmagaa ama siinta adeegyada horey wax uga-qabashada habboon ilmahaaga ama qoyskaaga. Xafiiska Gobolka Dhageysiga Maammultaanka ayaa ugula talo gali sakaal in la qabto dhageysi. Saraakiisha dhageysigu waa dad eex-laaan ku shaqeeya oo loo magacaabey iney qabtaan

Dhex-dhexaadin

Joorjiya waxay bixisa dhexdhexaadin in la dooran karo marka la xallinayo is-afgaranshawaaga. Dhexdhexaadinta waxa loo arkaa mid ikhtiyaar iyo xor ahaan ay ugu heshiiyaan labada qolooyinba. Waalidyada/Fidiyeyaasha wax looga baahan yahay ma aha iney isticmaalaan. Dhexdhexaadinta arrinteeda loo isticmaalimaayo in laguugu diido ama lagaaga raajiyo xuquuda aad u leedahay in si cadaalad ah gar naq nidaameyan laguugu fadhiisto oo iyada oo la hoos imanayo UMK ama xuquuq kasat oo hoos timaad UMK. Haddii dhexdhexaadin la codsado, waa in la dhammeeyaa 14 taariikh maalmeed gudaheeda.

Codsiga dhexdhexaadinta waa in la weydiistaa wakaaladda hogaanka ka ah deegaanka qoraal ahaan.Codsigaasi waa iney saxeexaan dadka weydiisanaya oo waa iney ku jirtaa weedho tilmaamaya qodabka(ada) la isku diiddan yahay ee la xidhiidha garashada, qiimeynta meeleynta ilmahaaga, siinta adeegyada horey wax uga-qabashada ilmahaaga ama qoyskaaga ku habboon.

UMK ee Joorjiya ayaa heshiis la gasha. Xarunta caddaalada ee Atanta (The Justice Center of Atlanta) dhedhexaadinta adeegyadooda. Xarunta caddaalada ee Atanta ayaa haysa liis dadyow ah dhexdhexaadiye u qalma shaqada oo leh sharciga iyo qawaaniina la xidhiidha siinta waxbarashada gaarka ah iyo adegyada la la xidhiidha, ooy ku jiraan horey wax uga-qabashada. Xarunta caddaalada ee Atanta aya la ogeysiin codsiga weydiisiga dhexdhexaadinta oo la xidhiidhi doonta laba qolaba sidii ay dib ugu fiirin lahaaayeen cabashada oo marka nidaamka dhexdhexaadinta iyo jadwal wakhtiga iyo goobta lagu qaadi doono ayaa laa samyn. Dhexdhexaadinta waxa loo jadwalin qaab wakhti ku tiirsan oo lagu qaban doonaa goob u sahlan labada qolaba.Dhexdhexaadiye xirfad leh oo cidnna u hiilineynnin oo ku tababarsan tabaha isda wanaagsan loogu dhexdhexaadiyo ayaa la kuli laba qolaba sidii ay uga caawin lahaayeen iney u helaan xal cabashada si caadi ah oo aan colaadi ku jirin.

Haddi aad aamminto in macluumaadka diiwaanka horey wax uga-qabashada waxa ku jira ee lagu ururiyey, lagu ahayo, ama lagu isticmaalo UMK ayaa aha khalad ama wax khaldaya ama wax u dhimaya asturnaanta shaqsiga ama xuquuqaha kale ee ilmahaaga ama qoyskaaga, waxaad codsan kartaa in wakaaladda hogaanka u ah deegaanku saxdo macluumaadka.

(1) Wakaaladdu ay goaan ku gaadho iney saxdo macluumaadka sida codsigu yahay, wakhti caqli-gal ah marka la helo weydiisiga.
(2) Haddii wakaaladdu diido iney saxaan macluumaadka sida codsigu yahay, waa lagu war-galin diiditaankaa oo lguu sheegi inaad xuquuq u leedahay in alguu faadhiisto oo lagu dhageysto.

Wakaaladda hogaanka u ah deegaanka, marka la codsado, ayey bixineysaa fursad lagu dhageysto sidii ka looga hadli lahaa macluumadka ku qoran horey wax uga-qabashada sidii loo hubin lahaa ineyna ahayn khalad, marin habaabis, ama haddii kale mid ka hor imaneysa asturnaanta shaqsiga ama xuquuqyada kale ee ilmaha.

(1) Haddii, waxa ka soo baxa dhageysigaas, lagu garto in macluumaadku yahay mid khalad ah, marin habaabis ah ama ama haddii kale mid ka hor imaneysa asturnaanta shaqsiga ama xuquuqyada kale ee ilmaha, wakaaladda hogaanka u ah deegaanka ayaa sixi doonta macluumaadka sideedaba oo kuugu sheegi doonta qoraal ahaan.
(2) Haddii, waxa ka soo baxa dhageysigaas, lagu garto in macluumaadku yahay mid khalad ah, marin habaabis ah ama ama haddii kale mid ka hor imaneysa asturnaanta shaqsiga ama xuquuqyada kale ee ilmaha, waxa lagu ogeysiin inaad xaq u leedahay inaad dhex dhigto diiwaan-qorka ilmaha weedho ka faalloonaya macluumaadkaas oo markaas soo hor dhigaya sababaha goaanka dhageysigaas aad uga soo hor jeeddo.

Faahfaahin kasta oo dhex dhigo diiwaanka qorka horey wax uga-qabashada ilmaha ee qaybtan waa in: (a) ay hayaan wakaaladda hogaanka u ah deegaanku si ka mid ah qayb horey wax uga-qabashada ah ilmaha ah ama qaybta la isku diiddan yahay (qaybta diiwaanka eed adigu aad diiddan tahay) ay hayaan wakaaladdani, iyo (b) Haddii diiwaanka horey wax uga-qabashada ilmuhu ee qaybta la isku diiddan yahay shaaca uga qaado wakaaladdani kooxo kale, faahfaahintu waa waa shaaca looga qaadaa qaybta.

Dhageysi fadhi ah oo hoos yimaad qaybtan waa in loo sameeyaa iyada oo hoos imaneysa Xuquuda Waxbarshada Qoyska & Sahrciga Asturnaanta Shaqsiga ama Family Education Rights & Privacy Act (FERPA), oo laga helo xeerka 20 U.S. C. §1232g, iyo qaannuunka 34 CFR Part 99. Qaab waxa u socodsiintani waxa laga heli karaa Qoraalka UMK Waajibaadka iyo Hirgalinata (BCW Standards and Implementation Manual), qaybta Qaab waxa u Socodsiinta Ilaalinta.

Waa in la helaa oggolaansho waalid inta aan shaqsi ahaan macluumaad la gara karo (1) aan shaaca looga qaadin dadka ka shaqeeya wakaaladaha ka qayb qaadanaya ama u isticmaalaya macluumaadka marka la hoos yimaad UMK, iyada ooy ku xidhan tahay waadhaha hoos ka xiga qaybtan; ama (2) loogu shaqeysto ujeedooyinka ka baxsan gudashada waajibaadka hoos yimaad UMK.

Macluumaadka diiwaanka ilmahaaga horey wax uga-qabashada looma sii deyn karo wakaaldha ka qayb qaataayaasha ah haddii aan adiga oggolaansho lagaa helin haddii waklaadda ka qayb-qaadaneysaa UMK ayna awood ka haysan FERBA mooye.

Wax-ilaaalinta hoos ku qoran waa in u meesha jiraa sidii loo hubin lahaa ku-kalsoonaata diiwaanka:

- Mid kasta oo ah wakaaladda hogaanka deegaanka ayaa ilaalineysa ku-kalsoonida macluumaadka shaqsiyaad ee la garan karo, keydinta, shaac uga qaadka, iyo talaabooyinka darajo ee lagu burburinayo;

- Hal qof oo ka socda mid kasta oo ka mid ah wakaaladda hogaanka ah deegaanka ayaa ka masu'uul ah sidii loo hubin lahaa ku-kalsoonida macluumaadka la garan karo ee shaqsiyaad;
- Dhamman dadka ururinaya ama isticmaalya macluumaadka shaqsiyaad ee la garan karo yaa tababar ama waxbarsho qaadan doona arrinta ku saabsan ueedooyinka iyo hab wax u qabadka ay UMK leeadahay oo dhaqmma waxa ay farayaan IDEA iyo FERPA;
- Mid kasta oo ah ayaa u haysa, si dadku u baadhaan, liiska ugu danbeeyey ee magaacda iyo darajadooda shaqaalaha wakaaladda ka shaqeeya ee marinka u leh macluumaadka shaqsiyaad ee la garan karo;
- Wakaaladda hogaanka deegaanka u ah ayaa war-galisa waalidka marka macluumaadka shaqsiyaad ee la garan karo, la hayo, ama lagu isticmaalo hoos imaadka UMK ee markaa laga maarmo een aan looga baahneyn ineyn u fidiyaan adeegyo ilmaha; iyo
- Macluumaadka waxa loo burburiyaa, marka waalidku codsadaan. (Diiwaanka waxa ku qoran ee ah horey wax uga-qabashada ay ka mid yihiin magaca ilmaha, ciwaanka, tiro telfoon, iyo taarikhda maammaha adeegyada horey wax uga-qabashada loo sameeyey waligeed waa la hayn.)

XALLINTA CABASHOOYINKA GAAR AH EE ILMAHA

Haddii aad ka aqbali weydo wakaaladda hogaanka ka ah deegaanka arrinta ah (1) garashada ((2)qiimeynta (3) meeleynta ilmahaaga (4) siinta adeegyada horey wax uga-qabashada ilmahaaga ama qoyskaaga ku habboon, waxaad xaq u leedahay in xal maammuled oo wakhti ku xidhan loo helo waxa aad ka welwelsantahay iyada oo la ishin dhexdexaadinayo iyo/ama nidaam cadaalad ku fadhiya loo gar noqo arrinta.